Tallaalada maxay yihiin?

Tallaaladu waxay tababaraan habka difaacaaga si uu jirkaaga u xasuusto xanuunka la dagaalami karo.

Tallaaladu waxay iska dhigaan fayras ama bakteeriya kadibna waxay jirkaaga barayaan jirkaaga inuu aqoonsado fayraska ama bakteeriyada. Tan Kadib, jirkaaga wuxuu diyaar u yahay inuu la dagaalamo cudurka haddii uu mustaqbalka la kulmo.

Tallaalada waa ammaan wax tarna way leeyihiin

Tallaal walbo waxaa la baaray badbaadadiisa iyo wax tarkiisa kahor inta aan loo isticmaalin bulshada guud.

Walaaca Guud

Dhammaan tallaalada waxaa ku jira jeelatiin

Waxaa jira wax yar oo jeelatinin oo ku jira tallaalada qaar balse waxaa jira xulashooyin la heli karo oo aan lahayn jeelatin. Tallaalada yar ee uu ku jiro jelatinka, culimada Islaamka waxay isku raaceen inay yihiin xalaal.

Tallaalada waad ku xanuunsan kartaa

Tallaalada ma sababaan inaad ku xanuunsato mana sababaan inay kugu ridaan cudurka ay ka hortagayaan. Dadka qaar waxay dareemaan waxyeelooyin ku taga sida ugu dhaqsiyaha badan.

Tallaalada waxay sababaan dib u dhaca koriinka

Tallaalada waxaa la darsay sanado badan. Saynis yahanno iyo dhaqaatiir caalamka daafahiisa kala jooga ayaa daraaseeyay haddii uu tallaalka sababi karo dib u dhaca koriinka waxayna ogaadeen inuusan dib u dhaca koriinka iyo tallaaladu wax xiriirka ah ka dhaxaynin.

Maalin ilaa laba Maalin

Tallaalada waxay yeelan karaan waxyeelooyin fudud sida qandho, xanuun, ama inay gaduudato goobta la duray, iyo madax xanuun. Waxyeelooyinkan fudud waxay ku baxaan maalin ilaa laba maalin gudahood.

Xitaa kadib marka tallaalka loo isticmaalo dadweynaha, badbaadada wali waa la kormeeraa.

Tallaalada waa ammaan wax tarna way leeyihiin

Xagee baan tagi karaa si aan wax badan u ogaado?

muhiim inaad macluumaad ka heshid ilo lagu kalsoonaan karo.

— La hadal dhaqtarkaaga!
— Eeg websayd-ka Centers for Disease Control and Prevention (CDC)
— Ama booqo Healthychildren.org

Somali Health Board
Peace, Unity, Life, Health